# Cilmi-baaris quseysa Galmada iyo Caafimaadka Taranka Iyo Naafooyinka ku nool Degaanka Kampala

Gudiga Haweenka Qaxootiga iyo Mashruca U-qareemida Qaxootiga
Diseemba 2013

## *WARBIXINTA DADKA KA QAYBQAATAY*

### ANAGU MAXAA NAHAY?

Gudiga Haweenka Qaxootiga {The Women's Refugee Commission (WRC)} waa urur muxalli ah ama aan dawli ahayn xaruutisana tahay dalka Mareenkanka. Waxaanu nahay urur ka shaqeeya cilmi-baaris iyo qaremida/doodista kaasoo u shaqeeya in uu difaaco xaquuqda, badbaadada iyo daryeelka bulshada la barakiciya ee dunida daafaheeda ku nool. Waxaana la shaqayna dawladaha, haaydaha iyo Haayada Caalimiga ah.

Mashruuca U-qreemida Qaxootiga {The Refugee Law Project (RLP)} waa mashruuc bulshada gaaristeeda ee hootaga Kuliyada Sharciga, ee Jaamada Makerere, Uganda. Waxaanu u shaqayna inaan quwadayno dadka soo barakacay iyo dadka lagu soo barakacay eek u nool dalka Uganda si ay ugu nasteexaystaan xaquuqda insaanka isla markaana ay ugu noolaadaan noolol sharaf leh. Taani waxa lagu gaara ayadoo loo maraya cilmi-baaris, bixinta adeegyada cawinta sharciga, caafimaadka maskaxda iyo adeegyada la talinta, jinsiga iyo adeegyada ka-hortagista xadgudubka galma iyo jinsi, isla marakaana khilaafaka, hooganka iyo kormeerista caadalada ku


*Sawirka: Xubnaha ka tirsan kooxda cilmi-baarista*

**Galamada iyo caafimaadka Taranka**

Qof waliba wuxuu leeyahay xaquuq uu ku helo xogta iyo adeegyada ay ayagu u-baahanyihiin si ay uga taxadiraan caafimaadkooda galma iyo taran. Tani waxa ka mid ah barashada sida jismigooda u shaqeeyo ayagoo noqonaya baaluqiin, isla markaana sida ay u-heli lahaayeen xirriir amniyaysan/la hubo. Tani waxa kale oo ka mid ah helida badbaado, wax ku ool, kharsh jaban iyo qorshaha lagu xadidaayo taranka oo la aqbali karo (Kala fogaynta dhalmada), sida cinjirka galmada iyo kaniinada looga hortaga uurka; helida daryeelka caafimaad kaasoo ka caawinaya dumarka inay helaan uur badbaado/amni iyo dhalida; helida adeegyada dadka ka badbaaday xadgubyada galmo; iyo helista xogta iyo adeeyada ee quseeya sida looga hortagi lahaa isla markaana looga taxadiri lahaa cudurada galmada laga qaado, oo ka mid yahay dulinka caateeya (HIV).

meel gaarka ah. Qaxootiga naafooyinka ah waxay ka mid yihiin kooxaha igu muhiimsan ee Mashruuca U-qareemida Qaxootiga (RLP) isla markaana RLP way la shaqaysa ayagu si loo hobiyo in ayagu ay ku nasteexaystaan xaquuqdooda.

## MAXAAN U NIMI KAMPALA?

Waxaan u soo booqanay Kampala si aan u fulino cilmi-baaris si loo helo baahida iyo walwalka shakhsiyaadka haya ee quseeya caafimaadka galmo iyo taranka dadkaaso qaba noocya naafooyin kala duwan (jismiya, dareen, caqliyan, maskaxiyan iyo nafooyin badan). Sido kale anagu waxaanu rabna inaanu barano waxyaaba badan oo quseeya dadka naafooyinka qaba fekirkooda si wax loo qaban laha isla markaan loo hormarin lahaa xaalada, marka lagu daro waxay ayagu qudhooda qaban lahaayeen.

## MAXAANU KA QABANAY KAMPALA?


Laba asbuuc gudahood oo Diseemba 2013 iyo hal asbuuc oo Janaayo 2014, Gudiga Haweenka Qaxootiga wuxuu la shaqeeyay Mashruca U-qareemida Qaxootiga ee kooxda Caafimaadka Maskaxeed iyo Daryeelka Maskaxeed si loo tababaro 12 cilmi-baarayaal qaxooti ah iyo kuwa diwaangeliya ka qaybqaatayaasha si loo fuliyo cilmi-baarista lagu samaynaayo dumarka naafooyinka da’adooda u dhaxaysa 20-49, ragga naafooyinka da’adooda u dhaxaysa 20-59 iyo dhalanyarada ka kooban wiilal iyo gabdho naafooyin ah da’adooda u dhaxaysa 15-19, eek u nool Kampala. Cilmi-baarayaasha qaxootiga ah iyo kuwa diwaangeliya ka qaybqaatayaasha waxa ka tirsan shakhsiyaad qaba naafooyin.

Wadar ahaan, kooxda cilmi-baarayaasha waxay la kulmeen 104 qaxooti qaxooti naafooyin ah-75 dumar iyo gabdho iyo 29 rag iyo wiilal kuwaasoo qaba naafooyin jismi, mid aragti, mid caqli, mid maskaxeed, mid maqal iyo kuwa qaba dhawr naafooyin. Waxay la kulmeen qaxooti kuwaasoo xaafada aan ka bixin, iyo 32 daryeelayaal iyo xubnaha qoyska dadka qaba naafooyinka. Hawlaha waxa la fuliyay luuqada sawaaxiliga, Soomaali, Kinyeruwaanda iyo Lugaandha. Hawlaha qaarkood waxa loo fuliyay kooxaha ahaan, isla markaana kuwa kale waxa loo fuliyay si shakhsi ahaan.

Markaanu dhagaysanay ka qaybqaatayaasha, waxaau baranay ama ogaanay aragtidooda iyo wacaadarooyinka ku dhacay. Waxaan ku shugrinaynaa la kulan kii aanu la kulanay ayagu iyo ogolaanshaha ay nala wadaageen xogtooda iyo sheekooyinkooda hab masuuliyad ku jirto.

## ANAGU MAXAANU BARANAY/ OGAANAY?

**Natiijada ugu horay** waxay muujinaysa in, si guud, dadka badankood ee qaba naafooyinka dareensanyihiin in la yasayo sababtana tahay naafooyin kooda**.** Dhamaan ka qaybqaatayaasha iyo daryeelayaasha waxay dareensanyihiin inay waajib tahay in tixgelin dheeraad ah la siiyo dadka qaba naafooyinka. Codsiga balaaran gaar ahaan ka imaanaya daryeelayaasha, waxay ahayd in ayagu dib u-dejin la siiyo, ayagoo badankood dareemeen daryeelkay ka helaan kampala gudaheeda inaysan ku fulinayn dadka nafooyinka ah ee ayagu ku tiirsan. Soo jeedinta kale waxa ka mid ah helida adeegyada marka ugu horaysa, meeshi aya ahaan lahayd inaad saf dheer la galin dadka



*Sawir: Tusaale khariirad jir ay sameeyeen rag qaba naafo caqli. (Hambalyo: RLP)*

kale. Codsiyada kale waxa ka mid ah fursadaha waxbarasho iyo tababarada farsama eek u haboon dadka naafooyinka ah iyo daryeelayaasha, si ay ula xiriiraan si wacan adeeg bixiyayaasha iyo u helaan fursad shaqo isla markaana dakhli u helaan.

Marka la eego adeegyada caafimaad, shakhsiyaadka qaarkood ee qaba naafooyin waxay ogaadeen in adeeg bixiyayaasha ayagu si wacan ula dhaqmaan sababtana tahay naafanimadooda. Haseyeeshe, ka qaybqaatayaasha iyo daryeelayaasha badankood waxay ka cawdeen adeegyada caafimaad aan ku filnayn iyo hab-dhaqanka xun ee shaqaalaha caafimaad.

**Turjubaann la'aan,** oo ay mid tahay luuqada dhagoolaha, iyo **gadiid la'aan** aan la gaari Karin goobaha caafimaadka, isla markaana **lacag la'aan aanan bixin Karin aanan siin Karin kuwa bixiya adeegyada caafimaad**, waxaa loo arkay caqabadaha in la helo daryeel caafimaad. Dadka badankood waxaad mooda inay isku waafaqeen in hadii ayagu aysan haysan lacag, ayagoo ah qaxooti, isla markaan ah shakhsiyaad qaba naafooyin, in gebi ahaan la is dhaafinayo/loo joojinay iyo la dayacaya ayna dayacayaan kuwa bixiya adeegyada caafimaad. Qarkood waxay sheegeen in ayagu ay sugaan maalinti oo dhan si ay u helaan adeegyada, hase-ahaate ay yimaadan guryahoodi ayagoon wax adeeg ah aan helin: "Hadii aad tahay cuuryaan/naafaysan tahay, adigu waad sugi, waad sugi, waad sugi."

## WACYIGELITA GALMO IYO CAAFIMAADKA TARANKA

Dadka badankood waxay yiraahdeen InterAid, Cusbitalka Mulago, Mashruuca U-qareemida Qaxootiga (RLP), Xarunta Dhexe Afrika ee Dhibanayaasha la Jirdilka (ACTV) iyo Gudiga Maamulka Caasumada Kampala (KCCA) waxay bixiyaan xog iyo adeegya ku saabsan galmada iyo caafimaadka taran, in kastoo helista la helayo xogta galmo la sheegay ay ku adagtahay dadka/shakhsiyaadka qaba naafooyinka caqli gaar ahaan.




Inkastoo, ka qaybqaatayaasha qarkood ogaayeen meesha ay kaga yaalaan jirka xubnaha taranka ee dumarka iyo ragga iyo sida ay u shqeeyaan, badankood si cad u ma garanayaan jirkooda. Kuwa qaba naafooyinka caqliga waxay dib ku qaban in aqoonsadaan isla markaana ogaadaan qaybaha jirkooda, iyo guud ahaan wax yar ay ogaayeen sida qaybaha jirkooda u shaqeeyaan. Dhalanyarada gabdhaha iyo wiilasha sidoo kale guurd ahaan way ogaayeen marka la barbardhigo dadka waawayn.

Ka qaybqaatayaasha badankood way ogaayeen dulinka caateeya (HIV) ama astaamaha qarkood ee xanuunada laisugu gudbiyo galmada, inkastoo ayagu mar waliba aysan si fiican u aqoon magacyada ama xaqiiqda sababaha. Sido kale waxay awoodeen inay tixaan/liiskareeyaan habab badan ee lagu kala fogayn karo dhalmada, ay ka mid tahay cinjirka galmada (Condom), kaniinada ay haween qaadan karto maalin waliba (Pills) ama duris/talaal/cerbad ay haween heli karto seddexdi billod hal mar (Injections). Dadka kale waxay sheegeen qalab lagu xiro halka ay is galaan kufka iyo minka (intrauterine devices), qalab qaabkiisu yahay sida T oo kale kasoo la geliyo minka dumarka (T-shaped device that is inserted into a woman's womb), isla markaana xiritaanka la xirayo tuubada ugxanta haweenka u gudbisa ilmo-galeenka iyo xiritaanka la xirayo tuubada shaawada

ragga xaniinyaha ka soo qaada (sterilization).

Inkastoo in yar oo ka mid ah ka qaybqaatayaasha ay awoodeen inay magacaabaan hababka loo kala foogeeya dhalmada, waxa guud ahaan jiray is aamin la'aan badan, isla markaana, khalad u fahmid, ee ku saabsan fursadaha ay ku dooran karaan kala fogaynta dhalmada. Dadka badankood waxay ka baqayaan in cinjirka galmada u dhego gudaha jirka dumarka, ama uu ka dhigi karo dumarka inay waayaan dhalmadooda gebi ahaanba (madhaso).ka qaybqaatayaasha kuwaaso aan xaafada ka bixi Karin ama qabay naafooyin badan waxay u muuqdeen inay wax yar ka ogaayeen galmada iyo caafimaadka taranka, gaar haan ayagoo haystay fursada kooban ay ka helaan xog dibada.

**Fursadaha Qarkood ee kala fogaynta dhalmada**

| | |
|---|---|
| Cinjirka Galmada (Condom)  | Kiniini (Pills)  |
| Cerbad (Injections)  | qalab lagu xiro halka ay is galaan kufka iyo minka (Intrauterine device)  |
| Qalab la geli helibka dhudhunka (Implant)  | Xog siyaada ah oo quseysa fursadaha kala fogaynta dhalmada booqa xarun caafimaad. |

**DHACDO GUUD OO DAREEN OO HAWEEN AMA GABADH NAAFO AH UUR QAADO**

Ka qaybqaatayaasha guud ahaanba waxay isku raaceen in hadii gabadh ama haween naafo ah ay uur qaado , hadii ama la qabinba waxay saameynaysa sida loola macaamili lahaa qoyskeeda iyo deriskaadaba. Hadii la qabo, uurka waa la soo dhawaynaya waxaana soo dhawaynaya ninkeeda iyo qoyskeedaba. Hadii aan la qabina, waa la takooraya. Qoyska iyo deriskaba waxay oranayaan waa "dhilo/qabxad," taaso "dhaqan xumo" la timi ama taaso "la kufsaday." Gabadha noocaan oo kale oo aan guursan, ka qaybqaatayaasha waxay yiraahdeen in ayadu korsan karto cunuga, or waalidiinteeda waxay ku qasbayaan inay is soo rido/tuurto ilmaha.

Marka gabadh ama haween uur ah isla markaana naafa ah ay diyaar u tahay inay dhasho cunugeeda, ka qaybqaatayaasha waxay yiraahdeen ayadu way sameen karta inay ku dhasho cusbitalka ama xaafada ayadoo ay dhalinayso haweenka dhaqanka ee naagaha ka dhaliyo, hooyadeed ama ayada qudheeda si qarsoodi ah. Hadii ay ku dhasho cusbitaalka, ayada lug ku aadaysa isbitaal ama tagsi. Waxay kale oo yiraahdeen xubin ka tirsan qoyska ama ilmaha aabahood ayaa ku u raacaya isbitaalka.

Ka qaybqaatayaasha badankood waxay dareensan yihiin in haweenka iyo gabdhaha uurka ahna naafooyin aan si wacan loola macaamilin iyo ixtiraam aysan ka heli adeeg bixiyayaasha caafimaad, ayagoo soo xiginaya sida: "Sidee adigoo ah qaxooti isla markaana qof naafa ah uur u qaadi karta?" iyo, "Ayadu waa dhib isla markaana waxay dhalaysa dhib kale."

**AHMIYAD-SIINTA AMNI/BADBAADO**

Ka qaybqaatayaasha naafooyinka guud ahaan waxay isku raaceen inay dareensan yihiin amni la'aan baahsan ama badbaado dhanka suuliyada/musqulaha iyo deriskoodaba. Labadaan meeloodba waxaa loo astaameeyay meelaha halista ah ee wareerka iyo kufsigaba ay macquul tahay inay dhacdo. Ka qaybqaatayaasha badankood waay ogsoonyhii daryeelka kufsiga ka dib iyo faa'idada in la raadsado daryeel caafimaad ka dib marka aad la kulantid xadgudub galmo.



*Sawir: Suuli/Musqul (Hambalyo: RLP)*

Meelaha kale ay ka qaybqaatayaasha ay dareemeen inay tahay amni daro guud ahaan waxay la xirriirtay gaarista goobaha adeegyada laga heelo. Tusaale, hadii dhisma leeyahay jaraanjarooyin ama ay u dhawdahay wado ama biyo, ka qaybqaatayaasha waxay dareensanyihiin inay tahay amni daro, gaar ahaan kuwa jismi ahaan ama aragti ahaan naafa ah.

Ka qaybqaatayaasha badankood, gaar ahaan kuwa aan xaafada aan kasoo bixin Karin, waxay yiraahdeen ayagu inay dareensanyihiin amni daro marka ayagu la joogaan xubnaha qoyskooda iyo daryeelayaasha. Kuwa kale-gaar ahaan kuwa caqliga ka naafaysan-waxay isku raaceen inay dareenmaan amni marka ay joogaan la taliyayaasha Mashruuca U-Qareemida Qaxootiga (RLP) kuwaaso ay kala hadli karaan arimahooda.

**Waa maxay adeegyada caafimaad ee muhiimka u ah dadka ka badbaaday xadgubka galmo?**

Hadii qof ka badbaaday xadgudub galmo u soo raadsado daryeel caafimaad kadib dhacdada xadgudub ayasoon daahin, waxay awooda:

- Inay hesho daryeel boogaha jirka ku yaala.
- Inay qaadato kiniini si ay uga hortag uur aan loo baahneen (Muda shan maalmood gudahood).
- Inay qaadato dawo looga hortagayo xanuunada/cudurada galmada la isugu gudbiyo.
- Inay qaadato dawo looga hortagayo dulinka caateeyo oo loo yaqaana HIV (Muda seddex maalmood gudahood).
- Inay hesho taageerada aasaasiga ah ee shacuureed.
- Inay hesho waraaq loogu gudbinaya adeegyada kale

**LA MACAAMILIDA IYO WAXA LA CAQBALI**

Dhamaan ka qaybqaatayaasha waxay isku raaceen in xadgudubka ka dhanka ah shakhsiyaadka naafada ah inaan la caqbali Karin. Inkastoo kala fogaynta dhalmada qasabka ah waxay badan u arkeen inay tahay waxaan la caqbali Karin, ka qaybqaatayaasha badankood waxay sheegeen in gabdhaha naafooyinka ah oo aan la qabi ama haweenka waxa laga yaaba in lagu qasbo inay isticmaalaan habaka dhalmada lagu kala fogeeyo waxaana ku qasba qoyskooda si looga hortaga uur kale.

Xiritanka la xiraya tuubada kasoo qaaday shaawada xaniinyaha sidoo kale lasoo gaarsiyay ragga ama wiilasha naafada ah, inkastoo hadii wiil ama nin cuuryaan ah uu gabadh ama haweenay naafa ah uureeyo loo

arko inuu tijaabinaaya ragganimadiisa. “Wiilka waxa loo arka inuu ayahay nin aad u quwad/tamar badan.”

**ANAGU MAXAANU QABAN DOONA?**
Gudiga Haweenka Qaxootiga (WRC) iyo Mashruuca U-qareemida Qaxootiga (RLP) waxay daraasyn doonaan xogta si qota dheer iyo waxay qori doonaan warbixin buuxda ku saabsan natiijooyinka cilmi-baarista lana socota talooyin (waxa ka mid ah talooyin ay soo jeediyeen ka qaybqaatayaasha) oo sida loo hormarin lahaa adeegyada galmada iyo caafimaadka taranka ee loogu talagalay dadka naafada ah ee ku nool Kampala. Waxaan la wadaagi doona warbixinta deeqbixiyayaasha, Laanta Qaramada Midoobay ee Qaxootiga qaabilsan (UNHCR) iyo haayadaha caalamiga ah kuwa qaranka ee rayidka ah ama maxaliga ah (NGOs)

Cilmi-baaris la mid ah sidoo kale waxa laga wada dalka Kenya iyo Nepal. Anagu waanu soo daabici doona natiijooyinka ka yimaada dhamaan dalalkaas ayadoo hal warbixin ah isla markaana waxaanu kula doodi doona dowladaha, haayadaha Qaramada Midoobay iyo hayaadaha caalimiga iyo kuwa qaranka si loo helo adeegyada galmada iyo caafimaadka taranka oo loogu talagalay dadka ama shakhsiyaadka naafada ah ee ku nool dunida daafaheeda.

**ADIGU MAXAAD SAMAYN KARTA HADII AAD RABTID INAAD OGAATID/BARATID IN BADAN CILMI-BAARISTAAN IYO WARBIXINTA?**
Xog dheeraad ah ee quseeya cilmi-baaristaan, fadlan la xiriir: Yusrah Nagujja414340547/0776897107. **y.nagujja@refugeelawproject.org**.

Hadii aad doonaysid xog dheeraad ah ee ku saabsan waxbin buuxda iyo qareemida Gudiga Haweenka Qaxootiga quseysa natiijooyinkaan, fadlan la xiriir: Mihoko Tanabe at **info@womenscommission.org**or booqa bogga kan **www.womensrefugeecommission.org**.

Warbixintaan waxa qoray Mihoko Tanabe isla markaana waxaana dib-u hubiyay YusrahNagujja, Apio Molly and Sandra Krause. Warbixintaan waxa tafatiray Diana Quick. Muqaalada waxa sawiray Stacey Patino. Sawirada waxa qaaday Mashruuca U-qareemida Qaxootiga (RLP).

Cilmi-baaristaan waxa fuliyay: Afugu Miriam (turjubaanka dhagoolayaasha); Apio Molly (Qoraaga xogta ku duuban cajalad); Banzi Josepha; Berlin Abdulkadir; Chirwa Francis;GatoNdabaramiye Joshua; Fiona Iradukunda;MamiAgnes; Namiyingo Agnes (Qoraaga xogta ku duuban cajalad);Nimo Hassan Ali; Pascaline Kwinjda; and Viviane Mushimiyimana.

Jan 2014



Women’s Refugee Commission | 122 East 42nd Street | New York, NY 10168-1289
212.551.3115 | info@wrcommission.org | womensrefugeecommission.org